



Brograamka Naxariista Kirada COVID-19 ee Fidsan (Expanded COVID-19 Rental Relief Program)

Brograamka Naxariista Kirada COVID-19 ee Fidsan (Expanded COVID-19 Rental Relief Program) waxaa loogu talagalay kireysteyaasha aan awoodin in ay bixiyaan kiradooda taasoo ugu wacan COVID-19. Waxaad dalban kartaa brograamkaan fidsan xattaa haddii aad kaalmo ka heshay Brograamka Naxariista Kirada COVID-19.

Sidee ayuu brograamkaan ii kaalmeyn karaa?

Brograamkaan wuxuu bixiyaa ilaa \$1,000 halkii bil inta ugu badan muddo saddax (3) bil waxaana loogu talagalay kirada aysan bixinin brograamyada kale sida federaalka, gobolka ama deegaanka. Muddada saddaxda bil waxay ahaan karaan bilahii la soo dhaafay ama bisha iminka socota. Kireystaha ayaa dalbado, kaddibna manaafacaadka waxaa la siiyaa milkiilaha hantida.



Sidee ayaan u dalbadaa?

Tag mainehousing.org/covidrent kaddibna riix battanka "Buuxi Arjiga Internetka Halkaan" ("Complete Online Application Here"). Waxaad dalban kartaa kirada bil kasta aadan bixin karin ilaa saddax (3) bil. Waxaad isla mar dhalban kartaa bilihii la soo dhaafay iyo bisha iminka socota. Waxaad u baahan tahay in aad mar kale dalbatid haddii aad u baahan tahay kaalmo bilaha mustaqbalka aadna gaarin xisaabta ugu badan \$3,000.

Maxaa dhaca kaddib marka aan dalbado? Sidee ayaa kharashka loo siin doonaa milkiilaha hantida?

Wakaaladda Hawsha Bulshada (Community Action Agency) (CAA) deegaanka ayaa ka shaqeyn doonto arjigaada. Iyaga ayaa kula soo xariiri doono si ay u xaqiijiyaan macluumaadkaada. Kaddibna waxay la xariiri doonaan milkiilaha hantida. Haddii milkiilaha hantida waafaqo in uu kaa qabto lacagta, kaama saari karo guriga xattaa haddii aadan bixinin baaqiga kirada kugu hartay bishaas. Kaddib marka milkiilaha hantida buuxiyo warqadahena loo baahan yahay, CAA waxay lacagta siin doontaa milkiilaha hantidaada. Fadlan xasuuso in aan la bixin karin lacagta ilaa CAA ka hesho dhamaan warqadaha loo baahan yahay.



Ma loo baahan yahay in aan u sheego milkiilaha hantida in aan ku talojiro in aan dalbado?

Haa! Xariirinta ka dhexeyso adiga iyo milkiilaha hantida waa muhiim. Inta badan milkiileyaasha hantida ma rabaan in ay lumiyaan dagganeyaasha wanaagsan, sidaas darteed xariirka wanaagsan waxaa laga helaa kaalmo. Waxaa kaloo muhiim u ah iyaga in ay ogaadaan in aad dalbatay maxaa yeelay waa in ay buuxiyaan kaddibna soo celiyaan warqadaha la xariira maaliyaddaan.

Maxaa dhaca haddii milkiilaha uusan ka qeybgelin?

Waxaan rajeyneynaa in milkiileyaasha hantida ka qeybgeli doonaan iyo in ay ogolaan doonaan lacag bixintaan. Hase ahaatee, kuma qasbi karno in milkiilaha in uu ka soo qeybgalo.

Kiradeyda waa ka badan tahay \$1,000. Maxaa ku dhici doono inta soo hartay? Ma leyga saari doonaa guriga?

Fadlan la shaqey milkiilaha hantida. Fa'iidadaan waxay kuu leedahay waxtar, hase ahaatee waa in aad weli bixisaa inta ka hartay kiradaada. Lagaama saari doono guriga bisha uu milkiilaha hantida kaa ogolaado in uu kaa qabto lacagta. Marka uu ogolaado lacagta, milkiilaha wuxuu raali ku yahay in uusan kaa saarin guriga bacdamaa aad bixin waaysay kirada bisha la bixiyay lacagta. Badbaadintaan ma quseeyso marka kireystaha looga saaro guriga asbaab kale ama marka uu bixin waayo kirada bilaha aan hoos imaanin brograamkaan.



Brograamka Naxariista Kirada COVID-19 ee Fidsan, Sii socda

Yaa heli kara kaalmo?



Dakhliga iyo Hantida

Waxaa lagu dabaqaa heerarka dakhliga, waxayna ku saleysan yahiin tirada reerkaada iyo dagmada. Waxaad macluumaadka ku saabsan heerarka dakhliga ka heli kartaa mainehousing.org/covidrent. Haddii aad awoodid in aad kiradaada ka bixisid nooc kasta dakhliga ku soo gala, ama in aad ka bixisid keyd ama hanti kale oo cad, ma dalban kartid brograamkaan.



Isbaddalada Shaqada iyo Nolasha

Waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid haddii aadan awoodin in aad bixisid kiradaada taasoo ugu wacan COVID-19. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah balse kuma koobna:

- shaqada oo lagaa fadhiisiyo;
- meesha aad ka shaqeysid oo lagaa xero;
- saacadaha shaqada oo la yareeyo;
- in aad guriga joogtid si aad u xanaaneysid caruurtaada maxaa yeelay waxaa la xeray xanaanada maalintii la geeyo cunugga ama dugsiga; ama
- khasaaro kale oo kaa soo gaartay dakhliga taasoo ugu wacan dilaaca cudurka COVID-19.



Goobta

Dagmada Lewiston iyo Cumberland (kuma jirto Brunswick) waxay leeyahiin brograam u gaar ah. Haddii aad daggan tahay Brunswick, dalbo brograamkaan. Haddii aad daggan tahay Dagmada Lewiston ama Cumberland, waa in aad dalbatid brograamyadaas. Haddii meelahaas joojiyaan brograamyadooda, waxaad dalban kartaa midkaan.



Nooca Guriga

Haddii aad daggan tahay guryaha la kabbo, nooc kasta, kaalmo kama heli kartid brograamkaan. Weydii milkiilaha hantidaada ama maamulaha hantida fursadaha axsaanka kirada la heli karo. Xaq uma yeelan doontid haddii aad:

- qaadatid Fojarka Xulashada Guriga (Housing Choice Voucher) ("Section 8"), haddii aad daggan tahay abarmanka "Section 8" ama aad kaalmada kirada (Rental Assistance) ka qaadatid Horumarinta Miyigga USDA (USDA Rural Development).
- daggan tahay guryaha horumarinta xaafadaha ay maalgeliyaan MaineHousing ama wakaalad ka tirsan federaalka;
- daggan tahay xaafad/hanti aadna isticmaashid canshuur celinta guryaha dadka dakhliga yar; ama aad
- daggan tahay guryaha dadweynaha.

Haddii aad leedahay guriga lagu guuro iyo boos la kireysto oo ku yaal beerta guriga lagu guuro, waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid brograamkaan. Lacagta ka soo baxda brograamkaan waxaa loogu talagalay oo keliya kirada dhulka ama kirada guriga lagu guuro. Waxaa dhici karto in aysan ku jirin kharashka ku baxa meelaha baabuurta la dhigto.



Ilaa muddo intee ayaa loo baahan yahay in aan ku dalbado?

Fadlan dalbo sida ugu dhakhsiyaha badan aad ku bilaabi kartid hawsha. Brograamka wuxuu socon doonaa ilaa maaliyadda ka dhamaato ama ilaa brograamka dhamaado.

Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan brograamkaan iyo si aad u dalbatid, fadlan booqo mainehousing.org/covidrent !



207-626-4600 | 1-800-452-4668
Faks 207-626-4652 | Laliska Maine 711

